



SOMALI

WARBIXIN KU SOCOTO WAALDIINTA KU HADA-SHA AFKA AAN AHEYN NORWEEJIGA

KU SOO DHAWAADA XANNAANADA CARUURTA
(barnehagaha)!



BOOS HADDII LOO HELO ILAMAHAAGA

Hadii ilmaha boos looga helo xannaanada caruurta / barnahaagaha waa inuu halkaasi joogaa ilaa uu sanad dugsiyeedku ka dhamaado.

GOORMUU ILMAHU BILAABAYAA

Waxaa laguu soo diri doonaa waraaq gooni ah oo ay ku caddahay taariikhda iyo qeybta uu ilmahagu bilaabayo. Waxaa muhiim ah in uu ilmaha la socdo mid kamid ah labadiisa waalid maalinta uu bilaabayo. Waalidiinta shaqeeya xaq bay u leeyihii in ay fasax hal maalin ah ka soo qaataan shaqada. Waa in aad soo hubsataa arrinkaasi.

Waa in aad isla eegtaan adiga iyo masuulka u xilsaaran tarbiyada-caruurta imisaa saacadood uu ilmaha u baahnaan karaa in aad la joogtid.

Ilmaha waa u soo qaadi kartaa wax yaabaha lagu cayaarsi- iyo amaba lagu maaweeliyo. Waxaa aan jeelaan laheyn in waalidiintu inoo sheegaan waxa aay is leeyihii ilmahoodu wa aay u baahnaan karaan.

DISTA ILMCHA

Waa in aad ogeysiisaa qof ka mid ah shaqaalaha marka aad ilmaha keeneysid ama Wadeysid. La hadal shaqaalaha oo waqtina la qaado. Weydii wax alaale iyo waxii aad isleedaha waa muhiim.

Waxaa aad muhiim u ah inaad horey u sii sheegtid marka **qof kale** ilmaha kuu soo qaadaayo.



MAQNAASHAHA ILMAHU AMA FASAX QAA-DASHO

Barnahaagaha waa in la soo ogeysiyyaa hadii uu ilamahu imaankarin maalintaasi, sababa xanuun ama fasax aawgiis **Maalmaha fasaxa guud**: dhammaan caruurta waa la fasaxaya xilliga fasaxa sommerka/ kuleylaha.

Ilmaha xanuunsadaa waa in lagu haaya guriga. Haddii uu ilmuu xanuusado isaga oo jooga barnehaagaha waxaa isla markiiba lala soo xiriirayaa waalidka.

DHARKA IYO QALABKA KALE EE ILMAHA

Maalin walba caruurga iyo shaqaalahaba dibidda ayaay u baxayaan. Sidaasi darteed waa in ilmaha loo soo diyaariyaa dhar ku habboon dhamaan cimmilada/ hawada xilli walba.

Ilma walba waxa la siinaya khaanad khaas ah oo dharka la gashto. Waalidka ayaa ka masuul ah dharka ha-gaajintiisa.

Walidiinta waa in ay caruurtooda u diyaarshaan dhar ku filan, kuna habboon xilli walba. Dharka sida saraawiisha hoose, kuwa kore, funanadaha, jakeetyada, isku joogga roobka, kabaha roobka iyo qabowga iyo waxa la midka ah waa in caruurta loo diyaarshaa.

Xilliga qaboobaha ah waa in ilmaha ay heystaan koofiyadda qabowga, gacma galiska, sharfka, dharka hoose ee suufka ah, funaanadda fleeceeka iyo dharka culus ee isku joogga ah. Xafaayad caruurga u baahan.



KABAHA GURI KU JOOGGA

Ilmahu waa in uu leeyahay kabaha guri ku joogga (kabaha furan). Noocaasi ayaa gudaha lagu joogayaa. Dhammaan kabaha iyo dharka waa in lagu ca-laamadeeyaa / qoraa magaca.

XILLIGA CUNNADA

Cunnada barnehaagaha laga cuno waa cunto nafaqo leh oo caafimaadka u wanaagsan, kuna yartahay sonkorta. Waxaa wanaagsan in ilmaha laga fogeeyo wax yaaba macmacaanka ee cuntada loo raaciyo sida saftida iyo waxa la midka ah.



DABAALDEGGA MAALIN DHALASHO

Waxaa si soo jireen ah barnehaagaha looga muujiyaa maalmaha dhalashada caruurga. Qaabka dhalashada loo muujiyanayo waa ay ku kala duwanyihii xaruumaha xannanada ama barnehaagayaasha.

XANAANAD AYAA KUU CODSANAYSA TURJUMAANKA

Turjumaan waa la heli karaa hadii loo baahdo, waxaana laga codsadaa waaxda khidmada turjumaadka. Marmar waa muhiim in turjumaan la helaa, siiba maalmaha uga horreeya, si waalidka iyo shaqaalahaba ay u gaaraan is-fahn fiican.

QORSHA HOWLEEDKA XARUUMAHA

XANNAANADA

Xaruumaha xannanada / ama barnehaage walba waxaa uu leeyahay qorshe howleed sanadle ah. Waalid walbana waxaa la siinaya isagoo qoraal ah. Qorshahaani waxaa ku cad qaabka caruurga loo xannaneynayo ama loo daryeeayo iyo weliba sida wax loo barayo. Xaruun kasta waxaa jooga qof shaqaale la soo baray ama loo soo taba baray xannanada, tarbiyadda iyo daryeelka caruurga.



WAR BIXINNADA KU SAABSAN XARUUMAHA XANNAANADA EE FREDRIKSTAD

Inta badan xaruumaha xannanada caruurga / brnehaagyasha ee ku yaala magaalada Fredrikstad waxaa leeyihi-in website-ya iyagu u gaar ah. Macluumaadka ku saabsan xaruumahaasi waxaad ka heli kartaan bogagga internetka.

<http://www.fredrikstad.kommune.no>

Produsert av:

Senter for flerspråklige barn og unge (FBU) med tillatelse fra Sandnes kommune.